

# English as a Second Language Programs



## Barnaamijka Barashada Luqadda Ingiriisiga

Ardayda waddanka Kanada ku cusub waxay badanaa u baahanyihiin in laga caawiyo barashada afka Ingiriisiga. Iskuulaad badan waxay leeyihiin barnaamijyo barashada afka Ingiriisiga looga caawiyo ardayda waddanka ku cusub si ay horumar uga gaaraan wax-barashadooda.

### Iskuulaadka Toronto oo idil ma leeyihiin barnaamijka waxbarashada ESL ka iyo macallimiintooda?

- Maya. Laakiin, haddii iskuulaadka Toronto ay qabaan arday badan oo u baahan caawinaad ku aadan barashada afka Ingiriisiga waxay u badantahay in iskuulaadkaasi ay qabaan barnaamijka ESL ka iyo macallimiintoodaba.
- Iskuulaadka qaar, macallinka dhiga ESL ka wuu caawiyaa macallinka fasalka u qaabilsan. Iskuulaad kalana, ardayda waxay leeyihiin xisado gooni u ah maalintii si macallimiin ku takhasustay barashada luqadda ay ugu fidiyaan barnaamijka ESL ka.
- Iskuulaadka aanan qabin macallimiin ku takhasustay barashada ESL ka, macallinka fasalka dhiga ayaa mas'uul ka ah in uu caawiyo ardayga. Laakiin, macallimiinta fasallada dhiga kulligooda ma wada laha tababar fiican oo ku aadan fidinta ESL ka.

### Sideen ku garanayaa iskuulaadka qaba barnaamijyada ESL ka?

Ma jiro hal meel oo laga heli karo liiska iskuulaadka fidiyo barnaamijka ESL ka, laakiin iskuul kasta shabakadda internetkiisa ayaa laga heli karaa warbixin dheeraad ah.

Guddoonka Waxbarashada Degmada Toronto (TDSB) iyo Guddoonka Waxbarashada Iskuulaadka Masiixiga ah (TCDSB) labaduba waxay leeyihiin is-duweyaal u qaabilsan barnaamijka ESL ka. Waxaad

kala xiriir kartaa:

- TDSB - 416-394-7330
- TCDSB - 416-222-8282, ext. 2715.

### Ma jiraan barnaamijyo loogu tala galay ardayda aan horey iskuul u dhigan inta aysan Kanada imaan?

- Guddoonada Waxbarashada ee Toronto labaduba waxay fidiyaan barnaamijyada Horumarinta Akhrinta iyo Qoraalka afka Ingiriisiga (ELD) si loo caawiyo ardayda aan horey iskuul u dhigan inta aysan imaan waddanka. Barnaamijyadaan, ardayda cusub waxay ku bartaan akhriska, qoraalka iyo ku hadalka afka Ingiriisiga.
- Guddoonka TDSB wuxuu fidiyaa barnaamij khaas ah oo lagu magacaabo LEAP (Literacy Enrichment Academic Program) oo loogu tala galay ardayda jirta 11 ilaa 16 sano oo wax-barashadooda hakad ka galay. Barnaamijkan wuxuu aradan ka caawiyaa in ay la yimaadaan aqoonta ay leeyihiin ardayda facooda ah, waxaana laga bixiyaa iskuulaad badan oo ah dugsiyada hoose/dhexe iyo dugsiyada sare.

### Fasal hoose miyaa loo celiyaa ardayda haddii aysan afka Ingiriisiga aqoon?

- Kolka ay suuro gal tahay, ardayda waddanka ku cusub waxaa la fariisiiyaa dugsiyada hoose oo ku beegan da'dooda.
- Ardayda dugsiyada sare ah waxaa laga qaadaa imtixaan afka Ingiriisiga ah iyo xisaab kolka ay soo galaan oo ay yimaadaan xarunta soo dhoweynta si loo hubiyo fasalka ku haboon. Ardayda dugsiyada sare dhigata oo luqad baradka ah waxay kala leeyihiin heerar kala duwan oo qaddarin waxbarasho ah. Xarunta soo dhoweynta waxay qiimeysaa heerka waxbara-



# English as a Second Language Programs

shada uu ardayga u baahanyahay. Xarunta waxay kaloo ay fidisaa adeega dejinta iyo xogwarran ku saabsan arrimaha dugsiga sare.

## Iskuulaadka ma u fidiyaan dadka waaweyn waxbarashada ESL ka?

Guddonada Waxbarashada ee Toronto labaduba waxay dadka waaweyn u fidiyaan waxbarasho luqadda Ingiriisiga ah oo noocyo badan leh kuwaas oo ka mid ah barnaamijyadooda Aqoon Kororsiga ah. Barnaamijkan wuxuu leeyahay qeybo ah barashada

luqadda, xogwarran ku saabsan adeega dejinta iyo waliba adeega shaqaaleynta.

## Halkeen ka helaa warbixin dheeraad ah?

Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijyada iyo adeegyada loogu talagalay ardayda waddanka ku cusub ka fiiri shabakadahan hoos ku qoran:

- Toronto District School Board: [www.tdsb.on.ca](http://www.tdsb.on.ca)
- Toronto Catholic District School Board: [www.tcdsb.org](http://www.tcdsb.org)
- Settlement Services: [www.settlement.org](http://www.settlement.org)